Ohio | Department of Job and Family Services

FACT SHEET

Medicaid Soo-koobid Barnaamij

Waa maxay Medicaid?

Medicaid-ku waa barnaamij daryeel caafimaad dadweyne oo ay kharashkeeda bixiyaan gobolka iyo dawladda federaalkuba. Waxay u bixisaa hoos imaadka daryeelka caafimaad ee daruuriga shaqsiyaadka qaarkood ee dakhliga xaddidan leh. Ohio gudaheeda, qofku waxa u xaq u leeyahay hoos-imaadka daryeelka caafimaad ee Medicaid lacag-la'aan ama qiime jaban haddii ay la kulmaan dakhli gaar ah iyo waxyaabaha looga baahan yahay u-qalmitaanka. Iyada oo barnaamijka xaq loo leeyahay, gobolku ma xaddidi karo tirada dadka u-qalma ee ka qayb-qaadanaya Medicaid ama ay u diiddo marin-u-helidda adeegyada caafimaad ee daruuriga ah si ay u xakameyso kharasyada.

Ayaa hoos-yimaad Medicaid-ka?

Medicaid-ka Ohio waxay u bixisaa hoos-imaad daryeel caafimaad carruurta, haweenka uurka leh, qoysaska iyo dadka waayeelka ah ee ah 65 jir iyo kuwii ka weyn iyo dadka leh naafonimada leh.Dadka ka mid ah isticmaalayaasha ayaa laga yaabaa in loo baahdo inay bixiyaan qaddar xilliyeed lacag (premiums) ama lacagta loo jaro caymiska (co-pays) adeegyada qaarkood. Kooxaha hoos-yimaad waxa ka mid ah:

Bar-tilmaameedyada Dakhliga Bishii

Le'ekaan Qoys	Qoysaska 90% FPL	Carruurta ilaa da'da 19 jirka ah iyo Haweenka Uurka leh 200% FPL
1	$813	$1,805
2	$1,093	$2,429
3	$1,374	$3,052
4	$1,654	$3,675

Tirooyinkani waxay ku saleysan yihiin bar-tilmaameedyada sabool-nimada Dowladda federaalka ah oo wey isbeddelaan sannad kasta.

- **Qoysaska iyo Carruurta**: Guud ahaan, qoysaska, carruurta (illaa da'da 19) iyo haweenka uurka leh ee dakhliga xaddidan leh (eeg shaxda) ayaa huwan Medicaid-ka iyada hoos timaad "Healthy Start" (Bilow Caafimaad-qaba) ama barnaamijyada "Healthy Families" (Caafimaad-qab Qoysas.Dhalin-yarada ka da' weynaaneysa nidaamka daryeelka korniinka markay da'doodu tahay 18 ayaa sii wadan lahaanshaha hoos imaadka daryeelka caafimaadka ilaa da'ad 21 iyada oon wax kharash ah ugu kicin.

  Qoysaska ka qayb-qaata barnaamijka Ohio First (OWF) ee ku taakulaynta lacagta ayaa si toos ah u hoos imanaya Medicaid. Qoysaska uga taga OWF iyaga oo hela shaqo ayaa u qalma 6-12 bilood hoos imaadka muddadaas kala-guurka ah markay tahay.

- **Dadka da'da weyn, Indho-la'aanta ah iyo kuwa Naafada ah (ABD)**: Dadka reer Ohio ee 65 jirka ama ka weyn iyo dadka leh naafonimada ee da' kasta leh yaa laga yaabaa inay u qalmaan hoos imaadka caymiska caafimaadka Mediciad. In uu u-qalanto Medicaid isticmaale ah dadka da'da weyn, indho-la'aanta ah iyo kuwa naafada ah gudaha 2009, qofku dakhliga la tirin karo ee soo gala bishu waa inuu ka yaraadaa $589. Waa inay waliba heystaan kheyraadyo (tusaale, lacag kaash ah, mid ay bangiga dhigteen ama istookyo (stocks) iwm.) ah $1500 am ka yar. Dadka is-qaba ama wada nool ee codsanaya Medicaid yaa ah inay helaan marka la isku daro dakhli ah $1,011 ama waxa ka yar iyo kheyraadyo ah $2250 ama ka yar.

- **Barnaamijka Medicaid "Spenddown" (Kharash-bixin-hoose)**: Xaaladaha qaarkood, isticmaalayaasha u codsanaya Medicaidka ahaan ABD ayaa la kulma waxyaabaha looga baahan yahay u-qalmitaanka hase yeeshee iyada oo ay jirto in dakhligooda oo sareeya. Shaqsiyaadkan ayaa ka qayb-qaadan kara barnaamijka Medicaid ee "Spenddown". "Spenddown" (Kharash-bixin-hoose) waa ka go'taan lacag oo bil katsa ah, taas oo soo gartay howl-wadha (caseworker)degmadu. In u qof u qalmo caymiska bisha ay doonto ha noqotee, isticmaalayaashu waxa inay dhiibaan xaqiijin tuseysa waxa ku baxay caafimaadka oo u dhiganta qaddarka kharash-bixin-hoose (spenddown). Waxa kale oo ay dooran karaan inay si toos ah ugu bixiyaan qaddar kakharash-bixin-hoose xafiiska degmada.

Continued

Medicaid Soo-koobid Barnaamij

Marka la gaaro kharash-bixin-hoose, isticmaalaha ayaa markaa u qalmaya Medicaidka inta bisha ka hadhay.

- **Ka qayb-galinta Mediciad (Medicaid Buy-In) ee shaqaalaha leh naafanimada (MBIWD)**: MBIWD waxay siisaa caymiska daryeelka caafimaad dadka shaqeeya reer Ohio ee da'da 16 ilaa 64 ee naafada ah. MBIWD wax loo abiiray in dhiirri-galiyo dadka reer Ohio ee naafonimada leh inay shaqeeyaan, isla markaana ay haystaan caymiskooda daryeel caafimaad. In u qofku u qalmo MBIWD, dakhliga la tirin karo wadar ahaan waa inayna ka badan 250% heerka saboolnimada federaalka (FPL, iyo waliba waa inay leeyiihn kheyraad aan ka badnayn $10,580. Qaddar bixin bishii kasta ah ayaa looga baahan yahay dadka u qalma MBIWDee leh isku dar dakhli sannadkii ka badan 150% FPL.

- **Mashruuca Kaansarka naaska iyo Makaanka (BCCP)**: Medicaid ayaa waxa kale oo bixiya hoos imaadka daryeelka caafimaad haweenka u qalma ee lagu baaray Waaxda Caafimaadka Ohio ee Mashruuca Kaansarka naaska iyo Makaanka. In u qof u qalmo mashruuca BCCP ee Waaxda Caafimaadka Ohio, haweenka dakhligoodu waa inuu ka hooseeyaa 200% FPL, da'doodana u dhaxeysaa 40-65 oo ay yihiin bilaa-caymis. Marka la baaro oo la ogaado in qofku leeyahay kaansarka naaska iyo/ama kaansarka makaanka, mashurrca BCCP ee medicaid ayey heli karaan haweenka u baahan adeegyada daaweynta.Haweenka hoos yimaad mashruuca BCCP ee Medicaid aya marin u leh dhammaan isku-duuduub manaafacaadka oo idil iyada ay u weheliso daaweynta kaansarka ay qabaan.

Qooraansi U-qalmitaan*

Ayaa Hoos-Imanaya?	Bar-tilmaameedka Dakhli
Dhalinta horey ugu jirtay daryeelka kori-inka ee d'ada 18 ilaa 21 sano	Ma jiraan bar-tilmaa-meedyo. Xaddidaad-yo ayaa jira.
Carruurta illaa da'da 19 jirka ah iyo Haweenka Uurka leh	200% FPL
Waalidiinta	90% FPL
Dadka Naafada Ah	~ 64% FPL**
Shaqaalaha Naafada ah	250% FPL*
Dadka 65-ka ah & wixii ka weyn	~ 64% FPL**
Qaatayaasha Medicare ee u baaha ka caawinta qaddar bixinta	200% FPL

*Arrimo ka reebban iyo xisaabinta ayaa saamayn ku leh qaddarka marka ugu dambeeya soo baxa ee loo tiriyo u-qalmitaanka. Go'aaminta u-qalmintaanka lafteeda waxa lagu sameyn doonaa xafiiska waaxda adeegyada shaqada iyo qoyska. Qybo ka mid ah u-qalmitaanka ayaa eega kheyraadka qofku u leeyahay marka la yimaad dakhliga caymiska caafimaad.

**Ka-jaritaannada iyo waxayaabaha ka reebban ayaa la tix-galin; tani tilmaam ku dhawaad ah. Dadka dakhliga ka badan 64% ee FPL yaa laga yaabaain laga jaro kharashyada caafimaad xisaabinta dakhliga sidii kharashka hoos loogu dhigi lahaa heerka "spenddown".

U-qalmitaanka iyo Hab-socodka Codsiga

Waaxyada adeegyada shaqada iyo qoyska ee deegaanka (county) Ohio go'aaminaya u-qalmitaanka barnaamijyada Medicaid marka la reebo barnaamijka BCCP. Arjiyada waxa laga heli karaa xafiisyada deegaanka ama onlayn oo ah halkan www.jfs.ohio.gov/ohp/consumers/application. Barnaamijyada qaarkood ayaa u baahan wareysi waji iska hor imaad ah oo lala yeesho howl-wadeenka halka barnaamijyada kale ay aqbalaan codsiga lagu sameeyo waraaq boosta lagu soo diro ama fax ahaan. Khadka taleefanka Isticmaalaha Medicaid ayaa la heli karaa sidii qofka loo siin lahaa caawimaad dhinaca codsiga, iyo in looga jawaabo su'aalaha guud iyo sidii loogu tilmaami lahaa isticmaalayaasha xafiiska ugu dhow ama bixiye daryeel caafimaad. Lambarka Khadka taleefanka waa: 1-800-324-8680/TTY 1-800-292-3572.

Sidee ayey isticmaalayaashu u helaan adeegyada Medicaid?

Marka ay is-qoraan, isticmaalayaashu waxay heli ka heli karaan adeegyo daryeel caafimaad bixiyaha Medicaid ee qaata Medicaid-ka caymis caafimaad ahaan. Tan badiyaa waxa loo yaqaan Medicaid-ka adeeg-lacag-ka-bixinta (fee-for-service Medicaid).Isticmaalyaasha ayaa dhici karta in looga baahdo inay ka helaan adeegyadooda qorshe daryeel ay maareyso Medicaid.Medicaid-ka adeeg-lacag-ka-bixinta iyo qorsheyaasha daryeelka maareysan labaduba waxya bixiyaan dhammaan caafimaadka hore ee baadi loo qabo, daryeelka deg-degga khuburaada u baahan iyo adeegyada ka-hor-tagga.

Continued

Medicaid Soo-koobid Barnaamij

Medicaid-ka Ohio ayaa waliba bixisa labadaba daryeel caafimaad guri iyo adeegyada laga helo goob arrintaas u gaar ah, isticmaalayaasha u baahan adeegyo daryeel waqtiga-dheer. Adeegyada daryeelka gurigu waxa u oggolaadaan isticmaalayaashu inay gurigooda iyo beeshooda dhex joogaan. Adeegyada daryeelka waqtiga-dheer ayey waliba heli karaan isticmaalayaasha u baahan daryeel iyo guryaha xannaneynta iyo goobaha loogu talagaly dadka maskax gaabinta leh. Waxyaabo lagu doorsan karo meelaha daryeelka lagu bixiyo ayaa loo fidinyaa Ka dhaafyo ah adeegyo ku saleysan guriga iyo beesha (tusaale, PASSPORT, Ohio Home Care).

Adeegyadee ayey Medicaid dabooshaa?

Barnaamijka Medicaid ee Ohio waxa ku jira adeegyo amartay dowladda federaalka ah iyo waliba adeegto ikhtiyaarkeed u ah Ohio oo ay dooratay inay bixiso. Adeegyada qaarkood ayaa ku xaddidan qaddarka lacagta la bixinayo, tirada booqashooyin ee la sameynayo sannadkii, ama goobta lagu bixin karo. Iyada oo laga reebo arrimo qaarkood, dhammaan adeegyada caafimaad ee daruuriga ah ayaa loo heli karaa isticmaalayaasha Medicaid.

Adeegyada Dowladda Federaalku Amreyso

- Xarumaha Qallinka Bukaan-Socodka
- Adeegyada kalkaaliye caafimaad qoys oo sharciyeysan
- Adeegyada kalkaaliye caafimaadka carruurta oo sharciyeysan
- Adeegyada iyo Waxyaabaha loo bixiyo qorsheynta qoyska
- Barnaamijka adeegyada Healthchek (EPSDT) (adeegyada baaritaanka iyo daaweynta carruurta ka yar da'da 21)
- Adeegyada caafimaad guri
- Isbitaal la seexdo
- Shey-baar iyo raajo
- Adeegyada caafimaadka iyo qalliinka indhaha
- Taakuleynta Qaddar Bixinta Medicare
- Gaadiid Xaalad aan Deg-deg Ahayn
- Adeegyada kalkaalie caafimaad ummuliso
- Daryeel Goob Kalkaalin Caafimaad
- Adeegyada bukaan-socod, oo ay ku jiraan ku ay bixiyaan Rugaha Caafimaadka Miyiga iyo Xarumaha Caafimaad ee ka Fasaxan Dowladda Federaalka ah
- Adeegyada Dhakhtarka

Adeegyada Ikhtiyaarka ah ee Ohio

- Ambalaansiyada
- Adeegyada kiroobiraaktiga Carruurta
- Daaweynta caadeysiga khamriaga iyo duroogada beesha
- Adeegyada caafimaadka beesha ee maskaxda
- Adeegyada ilkaha
- Qalabyada caafimaadka waqtiga badan la haysto iyo waxyaabaha loo isticmaalo
- Adeegyada ku Saleysan Guriga iyo Beesha Ka-Dhaafkeeda
- Daryeelka Hosbis (Hospice)
- Adeegyada madaxa-bannaan ee cilmi-nafsiga carruurta loogu talagaly
- Adeegyada Goobta Daryeelaka Dhexdhexaad ee dadka Maskax gaabis leh (ICF-MR)
- Baxnaanyn Mihnadeed
- Baxnaanynta jirka
- Daaweynta cagaha
- Daawooyinka la qoro
- Kalkaalin Caafimaad Gaar ah
- Baxnaanaynta Hadalka
- Daryeelaka aragga, oo ay ku jiraan muraayadaha indhaha